



Xafiiska Adeegyada Wanaagsan ee Meheradaha Macaamiisha (Better Business Bureau Consumer

Imika waxay macaamiishu bilaabeen in ay sameeyaan taxaddar sareeya oo sidii hore ka badan ka hor intayna shaqooyin ku bilaabin lacagahooda ay dadaalka xooggan u soo mareen (dollar-kas). BBB waxay sanad-welba ay malaayuun qof oo macaamiil ah ay ka caawisaa dhinaca warbixinta shaqooyinka (businesses) iyo dhinaca samafalka. Waxaa hoos ku qoran warbixin kooban oo ku saabsan adeegyada bilaa aan lacagta laga bixin uu bixiyo xafiiskaaga Adeegyada Wanaagsan ee Meheradaha (Better Business Bureau).

- **Qiimaynta Shaqooyinka ee BBB iyo Cabbiridda Shirkadaha:**

Ka-hor intaanad wax iibsas xaaladda shirkadda aad wax ka iibsansayid ka hubi BBB. BBB waxay shirkadaha ku qiimaysaa cabbiro u dhexeeya 'A' illaa 'F' (xuruufta Ingiriisiga), kuwaas oo ku-salaysan 12 shurudood oo xaqiiqooyinka jira ku-saabsan. Waxaa shuruudahaasi ka mid ah bal haddii ay jiraan cabashooyin dhinaca macaamiisha, in ay shirkaddu ay tahay mid sir u ah u fulisa waxyaalaha xayaysiisyadeeda ku jira, iyo in ay tahay shirkad leh dhammaan shatiyada xirfadeed ee loo-baahan-yahay iyo in kale.

- **Xalka Khilaafka:**

Kaddib marka aad shirkad wax ka iibsatid haddii aad dhibaatooyin la kulantid, waxaad isticmaali kartaa adeegyada aanad lacagta ka bixinayn (ee bilaa lacagta ah) ee xal-u-raadinta khilaafyada ee ay BBB bixiso. BBB iyada oo noqonaysa dhinac saddexaad oo dhexdhexaad ah ayey dadaal u gashaa sidii khilaafka jira xal degdeg ah oo cadaalad ku-salaysan oo dhammaystiran loogu heli lahaa. BBB waxaa kale oo ay bixisaa dhedhexaad bilaa lacag iyo dib-u-heshiisiin khilaafka lagu soo af-jarayo.

- **Digniin macaamiisha laga siinayo dhinaca khayaamo dhici karta:**

BBB waxay si joogto ah dabagal ugu samaysaa khayaamada iyo wax idaba-marinta macaamiisha loo gaysan karo. Waxaa khayaamooyinka dhici kara ka mid ah khayaamada dhinaca ciyaaraha bakhtiyaa-nasiibka (lottery) iyo arrimaha kale ee loo-baahanyahay in laga digtoonaado.

- **Wararka Macaamiisha, iyo Talooyinka iyo Waanada Dhinaca Warshadaha:**

Macmiilka xof-ogaalka ahi (waxyaalaha jira garanaya) waa macmiil wanaagsan. BBB waxay bixisaa wararka macaamiisha loo-gudbinayo, talooyinka dhinaca warshadaha iyo waanooyin ay ku baahinayso shabakadda internet-ka, iyo bogagga wargaysyada iyo xayaysiyada iyo qalabyada warbaahinta ee bulshada ee uu ka mid yahay 'Facebook'. Warbixinta aad u baahantahay waxaad ku heli kartaa keliya 'mouse-ka' kombiyuutarka oo aad 'dhag' ka siisid.

- **In qiimaha laga codsado Meheradaha (businesses) aad ku kalsoontahay:**

Haddii aad haysid shaqo gaar ah oo in la qabto u baahan, waxaad qiimaha ay shirkaduhu kuugu qaban karaan aad ku waydiin kartaa shabakadda internet-ka ee ah: wynco.bbb.org. Meheradaha haysta aqoonsiga BBB waxay ku siinayaan jawaabo ay shaqadaasi gaarka ah ugu tartamayaan. Maadaama ay dhammaan meheradahaasi yihiin kuwo ay BBB aqoonsatay, waxaad garanaysaa in si wanaagsan laguula dhaqmi doono.

- **Turjumaad:** Waxaad adeegyada BBB ay bixiso aad khadka internet-ka kaga heli kartaa luuqadda Isbaaniishka. Markaad xafiikayaga soo wacaysid, fadlan qof turjumaan kuu noqdo diyaarso.

Aaminaad Ku Bilow (Start With Trust)
Better Business Bureau® oo u adeega Woqooyiga & Wyoming
8020 South County Road 5, Suite 100
Fort Collins, CO 80528
www.wynco.bbb.org
970.484.1348 or 800.564.0371